

SIDA LOO


Joojiyo Shaqadaada ka ahaan IP




Waxaad si ikhtiyaari ah isaga casili kartaa shaqadaada CDWA adoo raacaya tillaabooyinka hoose. Tani waxay dhameyn doontaa shaqadaada aad ugu shaqeeneyso dhammaan Macaamiisha.

Sida Si Ikhtiyaari ah La Isku Casilo


1. Gal [bogga intarnetka DirectMyCare](#) ee CDWA.
2. Markaad joogto shaashada My Dashboard (Dhaashboodh-kayga), guji badhanka **Workday (Shaqada Maalinta)** si aad u tagto boggaaga koowaad ee Workday.
*Haddii aad tagtid bogga gelitaanka, geli isla magaca adeegsadaha iyo lambar sireedka ee loo isticmaalay in lagu galo [bogga intarnetka DirectMyCare](#).
3. Gudaha Boggaaga Bore ee Websaydka, guji sawirkaaga/cinwaankaada ku yaala dhinaca midig ee sare.
4. Dooro badhanka **View Profile (Eeg Bogga Aqoonsiga)** ee ku hoos yaala magacaaga. (Jaantuska 01)
Hadda waxaad ku jirtaa boggaada aqoonsiga.
5. Dooro badhanka **Actions (Tallaabooyinka)** ee ku yaala dhanka bidix ee ka hooseysa magacaaga. (Jaantuska 02)
6. Dooro **Job Change (Beddelida Shaqada) > Resign (Is-casil)**. (Jaantuska 02)




Jaantuska 01



Jaantuska 02



Jaantuska 03



Jaantuska 04

Waxaad arki doontaa bogga **Submit Resignation (Gudbi Is-casilaada)**.

7. Buuxi meelaha loo baahan yahay ee lagu muujiyay calaamadda xiddigta cas (*)
 - **Taariikhda Shaqo Joojinta ee La Soo Jeediyay:** Dooro taariikh-jadwaleedka si aad ugu darto maalintaada ugu dambeysa ee shaqada CDWA.
(Waa inaad siisaa Macmiilkaaga(shaada) ogaysiis qoran oo laba toddobaad ah. Tani waxay u ogolaanaysaa macmiilkaaga inuu helo wakhti uu ku helo IP ku beddela.)
 - **Sababta Koowaad:** Dooro goobta. Dooro **Voluntary (Ikhtiyaari)**, kadibna ka dooro sabab mid ka mid ah xulashooyinka ka soo muuqda liiska hoos u dhaca ee sida ugu fiican u qeexaya sababtaada. (Jaantuska 03)
8. (ikhtiyaari ah) Ku dhaji nuqul ah Warqaddaada Is-casilaada adigoo gujinaya taabka **Select Files (Doro Faylasha)** oona ka soo gelinaaya kombiyuutarkaada. (Jaantuska 04)
Sharaxaadda: Warqadda Is-casilaada
Qaybta: Shaqo Joojinta
9. Dooro badhanka **Submit (Gudbi)**.

20250402